



Federal Republic of Somalia
Office of the President

SHARCI LR. 13

TAARIKH: 21 /01/2016

OGGOLAANSHAHA ANSAXINTA SHARCIGA MAAGASHIGA SHISHEEYE

MADAXWEYNAHA J.F.S

Markuu Arkay: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfaha ' A ' , ' ' B ' iyo " c " ee Dastuurka KMG

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Xarfaka " F " ee Dastuurka KMG

Markuu Arkay: Qodobk 69aad, Farqadda 1aad, Xarfaka . A ' ee Dastuurka KMG

Markuu Arkay: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka Lr. 3/1/9/15 ee 23/11/2013 kuna saabsan Ansaxinta Hindise Sharciyeedka Maalgashiga Shisheeye

Markuu tixgeliyay: In laga maarmaan tahay inu la oggolaado Sharciga Maalgashiga Shisheeye si loo kobciyo Dhaqaalaha Dalka isla markaana ay Bulshada Soomaaliyeed u helaan fursad shaqo

Wuxuu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo maalinta uu Madaxwaynaha saxiixo waxaa la oggolaaday Sharciga Maalgashiga Shisheeye

Qodobka 2aad

Waxaa la farayaa Wasaaradaha iyo Hay'adaha saamaynta ku leh Maalgelinta Shisheeye inay si habsami leh ee waafaqsan Sharciga u dhaqngeliyaan.



Federal Republic of Somalia
Office of the President

Qodobka 3aad

Waxaa la farayaa isla sidaan inay muwaadaniinta iyo shisheeyayaasha uu khuseeyo Sharcigaa inay si buuxdo u ilaaliya.an isla markaasina ay dhoowraan.

Qodobka 4aad

Waxuu Sharcigaan dhaqangeliya isla markii uu Madaxwaynaha saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

MUQDISHO 21/01/2016

Madaxwaynaha J.F.S

Mudane Xasan Sheikh Maxamuud



Ref: 1005 /3/1/9/15: الرقم

Mogadishu, 23rd November 2015 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Ku: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Og: Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha.
Muqdisho.

Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

Og: Hanti-Dhowrka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

Og: Guddiga Ganacsiga, Warshadaha iyo Dhaqaalaha
L/H. Golaha Shacabka

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
L/. Golaha Shacabka.

Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda
L/H. Golaha Shacabka

Ujeedo: Ansixinta Sharciga Maalgashiga Shisheeye


M.ne Madaxweyne;


Waxaan kuugu wargelinayaa inuu Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya go'aan ka gaaray ansixinta Sharciga Maalgashiga Shisheeye oo halkan ku lifaaqan, wuxuuna Golaha Shacabka Kalfadhiga 7aad ee fadhigiisii 12aad 23^{kii} Nofeembar 2015 oo ka dhacay Xaruntiisa Caasimadda Jamhuuriyadda ee Muqdisho ku ansixiyey cod furan oo u dhacay sidatan hoos ku xusan:

- Xildhibaan Oggolaadeen: 143 (Boqol Afartan iyo Saddex Xildhibaan).
- Xildhibaan diidey: 1 (Hal Xildhibaan).
- Xildhibaan ka aamustay: 3 (Saddex Xildhibaan).

Haddaba, M.ne Madaxweyne waxaan si waafaqsan Qodobka 90-aad xarafka (f) ee Dastuurka JFS kaaga codsanaynaa in aad go'aanka Golaha ku oggolaato Xeer-Madaxweyne, si uu Sharci u noqdo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda si waafaqsan Qodobbada 84-aad iyo 85-aad ee Dastuurka JFS.

Anigoo huba in waajibkaaga Dastuuriga aad ka gudan doonto, waxaad magaca Golaha Shacabka nooga guddoontaa salaam diiran iyo qaddarin gaar ah.


M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka




MJ/AM

ANSIXINTA SHARCIGA MAALGASHIGA SHISHEEYE.

Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS

Tirada Xubnaha Codeysay 147: Oggol (143) Diidmo (1) ka aamustay (3)



Saxiix: M. ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"


Taariikh: 23rd November 2015

Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Baarlamaanka JFS

Saxiix: M. ne Jeylaani Nuur likar *Shaqo ku maqan*

Taariikh: 23rd November 2015

Guddoomiye ku-xigeenka 2aad- Baarlamaanka JFS



Saxiix: M. ne Mahad Cabdalla Cawad

Taariikh: 23rd November 2015

~~FADLAN SIYADUDDIN~~

Waa la
ousi xiyeey

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka
Guddiga Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo
Warshadaha



جمهورية الصومال الفدرالية
مجلس الشعب
لجنة الاقتصاد والتجارة والصناعة

Federal Republic Of Somalia
House Of The People

Parliamentary Committee on Economy, Commerce and Industry

XGS. Guud
ovag bossa
Daad.

Ref: GDHG& W/11/2015

23/11/2015

Tr: 18/11/2015

Ku: Guddoonka Golaha Shacabka

=Muqdishow=

Ujeeddo: Soo Gudbin Wax ka beddelka Sharciga Maal-gashiga Shisheeye (law no 19 1987)

MudaneGuddoomiye,

Hindise Sharciyeed Maalgashiga Shisheeye ayaa Guddiga Dhaqaalaha ,Ganacsiga iyo Warshadaha loo soo gudbiyey taariikhdu markii ay ahayd 12kii Juun 2013,wuxuuna akhrista koowaad maray 19kii Juun 2013kii. Kaddib markii Guddigu daraasad dheer ku sameeyey waxaa u soo baxday Draftiga hindise sharciyeedka uu wax badan ka fiicanaa Sharciga lam 19 ee 1987kii,kasoo la sameeyey sannadihii ugu dambeeyey ee Dawladdii Kacaanka hase yeeshee aan lagu dhaqmin. Guddigu wuxuu kutaliyey in ey habboontahay in Sharcigaas lagu sameeyo wax kabadde (Amendment) , hal kii meel cidla ah wax laga billaabi lahaa.

Sidaa sawgeed baa Xukuumaddu dib ula noqotay hindise sharciyeed kaas 15kii December 2014kii, ayagoo laysla qaatay qodobbada wax ka beddelka lagu sameeynayo ee Sharciga lam. 19 ee soo baxay 1987kii,Golaha Wasiirraduna isku raacay go'aanka summaddiisu tahay SHGW.00.26.07.15 ee 23kii Juun 2015 kaasoo sirasmi ah sharciga wax kabaddeka dib ugusooceliyey GolahaShacabka.

Guddigu wuxuu wadashaqayn la yeeshay Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha, W.Qorsheynta & Iskaashiga Caalamiga ah , Warr .Dibedda & Dhiirrigelinta Maalgashiga iyo W.Shaqada iyo Shaqaalaha, Bangiga Dhexe iyo Rugta Ganacsiga & Warshadaha sidii Sharcigaas looga dhigi lahaa mid waqtigan la socon kara waxna ka tari kara soo jiidashada Maal-galinta Shisheeye ee J F Soomliya.

Waxaa Guddigu is garab dhigay Sharciyada Maal-gashiga ee ka jira 22 dal oo kuwa sookoraya ah oo ay ku jiraan dalalka aan deriska nahay,waxaana aakhirikii ay ku dhammaatay inaan wax kabadde kusamaynay 17qodob ayadoo 10 qodobna sidii ay ahaayeen loo daayey. Uruurinta xogta iyo katalo bixinta Sharcigan waxaa nagala qayb qaadatay Hay'adda Chimoniks SSG.

Sidoo kale, waxaa Guddigu qabtay wadatashiyo iyo dhagaysi Dad-weyne (public hearing) afar jeer sannadkan gudhiisa ayadoo ay kasooqayb galeen qaybaha kala duwan ee bulshada , aqoon yahannada Jaamacadaha ,ganacsatada ,Wasaaradaha dhaqaalaha iyo khubaro ajnabi ah taariikhdu markay ahayd 10kii Juun,13kii July, 15kii September iyo 10kii November 2015, waxayna ku kordhiyeen ra'yigooda.

Waxaa kaloo guddigu halkan kusoo daray talooyinkii wax ku oolka ahaa ee xildhibaannadu ku kordhiyeen sharcigan akhriiskii 2aad.

Guddiga Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Warshadaha
E-mail benadam43@hotmail.com /+252-618850679

AG. SIYADUDDIN

fadlan eeg Boga labaad.

1086
10/11/15

Sidaas awgeed Ayaan mudane Guddoomiye halkan kuugu soo gudbinaynaa nuqulkii kama dambeysta ahaa ee Sharciga Maal-gelinta Shisheeye si uu u maro akhriska 3aad, Baarlamaankuna ugu codeeyo annagoo rajeynayna in Sharcigan dalkeena u soo jiido boqollaal malyuun oo maal-gelin shisheeye ah uuna wax weyn kataro shaqo abuurista dhallinyarada Soomaaliyced ooda'doodu u dhaxayso (14-29) oo 67% shaqo la'aanhayso ,sababtaas awgeedna ku dhammaaday tahriibka badaha iyo ku biiridda xag jirnimada.

Salaandiirranigaguddooma,

XildhAbdullahi Jama Hussein

Gud/miyahaGuddiga Dh/W/Ganacsiga

ogge 143

Friday 1

Amus. 3

J. Hussein

23/11/2015



Ku: Guddoomiyaha Baarlamaanka J. F. Soomaaliya

Ujeeddo:- Soo Gudbin Hindise-sharciyeedka Maal-gashiga Shisheeye ee Soomaaliya

Mudane Guddoomiye;

Waxaan halkaan si xushmad leh kuugu soo gudbinayaa hindise sharciyeedka maal-gashiga shisheeye ee Soomaaliya, oo nagu dhiiri-galinaya hollinta tallaabo horumar leh oo ku salaysan himilada Dawladda ee soo celinta nidaamka iyo ku dhaqanka shuruucda oo ah aasaaska nolasha Dawladnimo waana mid si cad oo qaabaysan isu fahiraya, waafaqsanna Dastuurka, ujeeddadiisuna ay caddahay.

Haddaba, Mudane Guddoomiye waxaan si xushmad leh kaaga codsanayaa dedejinta iyo meel marinta hindise sharciyeedkan kor ku xusan, maadaama baahi weyn loo qabo ku dhaqankiisa marxaladda haatan uu Dalku ku sugan yahay awgeed.

Mahadsanid



Mudane Cabdi Faarax Shirdoon (Saacid)
Ra'iisul-Wasaaraha xukuumadda FS



Handwritten text in Somali script, likely a signature or official stamp, located in the top right corner of the page.

SUMMAD/00 145 WGW/013

Date : 26/05/2013

Ku: Ra'iisal Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaliya

Ujeedo: Soo gudbin xeerka maalgashiga shisheeye

I). Sharciga wuxuu ka mid yahay shuruucda dalka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliyeed, wuxuuna waafaqsan yahay Dastjurka KMG ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, waa sharci loogu talagalay in lagu maareeyo arrimaha maalgelinta shisheeye oo afka qalaad lagu yiraahdo (Foreign Investment Law), sharcigan wuxuu si qoto dheer u qeexayaa arrimaha hoos ku taxan:

- Qaabka dadka shisheeyahay ah u maalgashan karaan dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
- Qaabka ay isu diiwaangelin karaan shirkadaha shisheeyaha ah ee doonaaya in ay maalgashi ku sameeystaan Dalka Soomaaliyaa;
- Fududeynta dhammaan shuruudaha laga doonayo ganacsadaha ama shirkadda maalgashiga doonaysa;
- Guddiga awoodda u leh maamulka iyo maareeynta sharciga maalgashiga shisheeye;
- Xuquuqaha uu leeyahay ama leedahay cidda maalgashanaysa dalka Soomaaliya, gaar ahaan ganacsatada ajinabiga ah;
- Hay'addaha ku shaqada leh ee sida tooska ah ay ula xiriiri karaan gnacsatada maalgashiga rabta.

II) . Sharciga waa sharci aad iyo aad u muhim ah, wuxuuna tirtirayaa sharcigii ka horreeyey ee lambarkiisu ahaa 19/09/1987 kuna saabsanaa maalgashiga shisheeye, muhiimadiisana waxaa ka mid ah:

- Mar haddii laga gudbay xilligii ku meel gaar, loona gudbay Dowlad taam ah oo Federaal ah waxaa lagama maamrmaan noqotay in la helo sharci lagu maareeyo ganacsatada Ajinabiga ah ama shisheeye oo doonayaa in ay dalka maalgashadaan;
- Diyaarinta sharcigan oo ka mid ahaa qorshihii Lixda bilood ee ay Xukumada Cusub ku talagashay;
- Sharcigan oo haddii aan la soo saarin aqabad ku noqon lahaa habsami u socodka maamlgashiga Dalka, gaar ahaan ganacsatada shisheeye;
- Dhaqan galka sharciga oo wax weyn ka tari doona siyaasadda dhaqaalaha dibedda iyo gudahba;
- Shrciga oo abuuri doona in ay ganacsatada Ajinabiga ah ku kalsoonadaan iala markaasna aaminaan in ay xoolahooda gashadaan dalka, kadib markay akhristaa;
- Sharciga wuxuu wax weyn ka tari doonaa horumarka dhaqaalaha Dalka Sooaamliyeed.

III). Sharcigan habeyntiisa ama diyaari tiisa waxaa ka shaqeyey guddiyo ka koobanaa sharci yaqaano, iyo xcelandheeryaal dhanka ganacsiga iyo maalgashiga ah, waxayna sameeyntiisa ku qaadatay dhowr bilodd.

Miisaaniyadda sharcigan lagu sameeyeyna waxaan iyadoo qeexan u gudbinayanaa Wasaaradda Maaliyadda, waxaana lagu soo dari doonaa miisaaniyadda dib u eegidda bisha June 2013.

Mudane

Mudane: Maxamuud Axmed Xasan
Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha





Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

SHARCIGA MAALGASHIGA SHISHEEYE

Sharci Lr: _____
ee _____

QODOBKA- 1^{aad}:
Qeexis

Erayada Sharcigan ee hoos ku qoran, waxaa loola jeedaa sida soo socota:

- 1. “Maalgeliye Shisheeye”** Waxaa loola jeedaa Qof kasta oo shisheeye oo leh shakhsiyad qaanuuni ah ama u jira Qof ahaan oo maalgashi ku sameeya dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed si waafaqsan sharciga Soomaaliya.
- 2. “Guddiga Maalgashiga shisheeye”** Waxaa loola jeedaa “Guddi” leh awooda ugu sareysa ee go’aan ka gaarista dhammaan arrimaha la xiriira maalgelinta shisheeye.
- 3. “Xafiiska Dhiirrigelinta Maalgashiga”** oo loogu yeeri doono “Xafiiska”, waxaa loola jeedaa Xafiiska Maamulka iyo Dhiirrigelinta, xilkiisuna yahay ku gacan siinta Guddiga gudashada xikooda.
- 4. “Maalgelin la Ansxiyay”** Waxaa loola jeedaa, maalgelin shisheeye uu ansixiyey Guddiga Maalgashiga Shisheeye si waafaqsan sharcigan.
- 5. “Faa’ido”** Waxaa loola jeedaa “dakhli saafi ah”, oo laga bixiyey canshuurihii ku waajibay si waafaqsan sharciga jira.
- 6. “Maalgashi Shisheeye oo Diiwaangashan”** Waxaa loola jeedaa maalgashigii asalka ahaa ee la ansixiyay laguna daray faa’iido dib loo maalgashay si waafaqsan sharcigan.

QODOBKA- 2^{aad}:
Qaababka Maalgelinta Shisheeye.

1. Maalgelinta shisheeye waxaa loo sameyn karaa hababka soo socda:
 - a. Lacagta Sarrifmi karta ee uu gooyey Bankiga Dhexe ee Soomaaliya loona xawilay Soomaaliya:
 - b. “Makiindo, Qalab, qalab dayactir ah, Rakibaadda iyo wax soo saarka, oo soo dejintooda lagu oggolaaday si waafaqsan sharciga soo dejinta;
 - c. Milkiiyadda curinta fikradda ee ka diiwaan gashan Soomaaliya, oo aan looga maarmeyn fulinta hawlaha Maalgashiga lagu Ansixiyey;
 - d. Wadarta lacagta qalaad ee la geliyey draasadadaha iyo qoraallada farsamo, ee loo diyaariyay, xiriirna la leh Maalgashi shisheeye ee la Ansixiyay.
 - e. Faa’iidada dib loo maalgeliyay, oo markeedii hore ka timid maalgashiga shisheeye ee la ansixiyay si waafaqsa sharcigan.
2. Maalgashiga la xusay waa iney ujeedada loo sameeyey tahay dhismaha ama ballaarinta shirkad lagu dhisay kana diwaaangashan Soomaaliya.

QODOBKA- 3^{aad}:
Guddiga Maalgashiga Shisheeye

1. Guddiga, waxaa dhisaya Wasaaradda Qorsheynta iyo Iskaashiga Caalamiga, wuxuuna kulmaya ugu yaraan bishii laba jeer.
2. Guddigan wuxuu ka koobanaan doonaa:
 - a. Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Qorsheynta iyo Iskaashiga Caalamiga.
 - b. Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda.
 - c. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyada
 - d. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha.
 - e. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada;
 - f. Agaasimaha Guud ee Bankiga Dhexe
 - g. Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga & Warshadaha
 - h. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda ay hoos imaaneyso masuuliyadda hawsha ay maalgelinta shisheeye ku saabsan tahay, marka laga reebo Wasaaradaha kor ku xusan.
3. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha ayaa noqonaya Guddoomiyaha Guddiga.

QODOBKA- 4^{aad}:
Xilalka Guddiga

1. Guddiga xilalkiisu waxay noqonayaan sida soo socota:
 - a. Iney u ansaxiyaaan maalgashiga shisheeye si waafaqsan tilmaamaha siyaasadeed ee lagu jideeyey Qodobka- 7aad ee sharcigan;
 - b. Iney ansaxiyaaan diwaan gelinta maalgashiga shisheeye
 - c. Iney dib u eegaan diwaan gelinta maalgashiga shisheeye ee lagu sameeyay sharci horey u jiray, si maalgashigaasi uu uga faa'iideysto sharciga u roon, sida ku cad Qodobka- 20^{aad} ee sharcigan;
 - d. Iney go'aamiyaan qiimaha maalgelinta shisheeye ee la sameeyey sida ku cad Qodobka- 2^{aad}, xarfaha (b), (c) iyo (d) ee sharcigan;
 - e. Iney hubiyaan u higgaansanaanta Qodobka- 16^{aad} ee ku saabsan heshiisyada amaahda laga qaato ilaha gudaha;
 - f. Iney u fududeeyaan dal ku galka shaqaalaha shisheeye ay shaqaaleeyaan shirkadaha u diiwaangashan si waafaqsan sharcigaan; Wuxuu sharcigaan, wuxuuna ku waajibinayaa in dhammaan shirkadaha maalgashanaya Soomaaliya shaqaaleeyaan, tabababaraan Shaqaalaha Soomaalida, ayna shaqaalaynta muwaadiniinta Soomaaliyeed noqoto ugu yaraan boqolkiiba konton 50% ee dhammaan shaqaalaha shirkadda, qandaraaslayaasha iyo la-taliyaashuna waa iney deggan yihiin Soomaaliya.

- g. Iney qabtaan hawl kasta oo kale oo ku saabsan maalgelinta shisheeye ee waafaqsan sharcigan.
2. Ansixinta Guddiga iyadoo la raacayo faqradda 1^{aad} ee Qodobka-n, waxaa loo marayaa habraaca ku tilmaaman Qodobka- 9^{aad}.

QODOBKA- 5^{aad}:

Guddiga: Kooramka iyo Codka

Todoba xubnood oo ka tirsan Guddiga, ee uu ku jiro Guddoomiyaha, ayuu ku ansaxmayaa fadhiga. Go'aamada Guddiga waxaa lagu gaarayaa cod aqlabiyad fudud.

QODOBKA- 6^{aad}:

Xafiiska Horumarinta Maalgashiga Shisheeye

Waajibaadka Xafiiskan waa sida soo socota:-

1. Dhaqan-gelinta go'aanada ay gaaraan Guddiga;
2. Soo jeedinta maamulka iyo habraaca habeeya lagama maarmaanka u ah dhaqan-gelinta sharcigan;
3. Iney warbixin iyo talo ka siiyaan maalgaliyaha shisheeye arrimaha la xiriira maalgashiga shisheeye sida, codsiga, nidaamka diwaangelinta ee lagu sheegay sharcigaan, canshuurta, heerka sarrifka lacagaha qalaad, shuruudaha dhaqaalaha, nidaamka nidaamka ganacsiga shisheeye, fursadaha maalgashiga ee jira, qaab-dhismeedka hay'adda maaalgashiga; ilaha maalgelinta gudaha ee deymaha iyo raadinta shurakada;
4. Iney maalgeliyayaasha ka kaalmeeyaan shuruudaha dhaqangelinta ee la xiriirta maalgelinta shisheeye; oo ay ku jiraan shuruudaha shaqada guryaha.
5. Iney Maalgashiga shisheeye ee la ansixiyey gacan ka siiyaan marxaladaha iskaashiga iyo horumarinta, una fidlyaan hagid iyo talo la xiriirta Hay'adaha rasmiga ah ee ku shaqada leh maalgashiga iyo habraaca maamuleed ee loo maro;
6. Iney qaabeeyaan talooyin ku saabsan siyaasadda maalgashiga shisheeye iyo horumarinta shuruudaha maalgashiga;
7. Iney dhiirrigeliyaan soona jiitaan maalgashi cusub ee shisheeye iyagoo kaashanaaya hay'adaha kale ee ku lug leh arrimahan;
8. Iney sameeyaan wax kasta oo kale oo la xiriira maalgashi shisheeye ee uu Guddiga u xilsaaro.

QODOBKA- 7^{aad}:
Mudnaanta Maalgelinta iyo Qeybaheeda

1. Waa in mudnaanta la siiyaa maalgashiga shisheeye ee ku aadan hab:
 - a. U jiheeya wax soo saar cududda aadanaha iyo khayraadka dabiiciga ah ee Soomaaliya;
 - b. Soo kordhiya tiknoolajiyadda cusub oo ku habboon daruufaha dalka;
 - c. Abuura dakhli cusub ama baajiya lacag adag oo ku timid dhoofin, ku beddelasho adeegyada ku saleysan keenista ama hawl adeeg;
 - d. Qayb ka qaadata si xilkasnimo ah, horumar waara iyo horumarinta dhaqan-dhaqaale ee gobol ahaan isku dheelli-tiran.

2. Tan waxaa si gaar ah loola jeedaa maalgashiga shisheeye ama si dhow ula xiriirtaa:
 - a. Beeraha;
 - b. Xoolaha;
 - c. Kalluumaysiga;
 - d. Kheyraadka dabiiciga ah;
 - e. Hawlaha warshadaha oo si wax ku ool ah u isticmaala kheyraadka kor ku xusan;
 - f. Dalxiiiska, wxaana shardi u ah in maalgashigaa uu la jaanqaadi karo xaaladaha dhaqan, dhaqaale iyo kaabayaasha jira
 - g. Maalgashi wax soo-saar kasta oo kale. Hawlaha Tiknoolajiyada, wax soo saarka iyo adeegga aan looga maarmeyn iney xoojiyaan dardarna geliyaan, ilaa heer la taaban karo, horumarinta qaybaha kor lagu soo sheegay.
 - h. In laga talo bixiyo hantida dhul ee iibka loo rabo taas oo si wada jir ah laysaga kaashanayo u adeegsiga nidaamka (PPP) wadaaga gaarka loo leeyahay iyo midda guud.

3. Arrimaha uu xeerinayo Qodobka-ni kama horimaanyaan Qodobka- 21^{aad}.

QODOBKA- 8^{aad}:
Habraaca Codsiga

1. Codsiga Maalgeliyaha Shisheeye wuxuu ka billaabanyaa buuxinta “Arjiga Codsiga Ansixinta iyo Diiwaangelinta”, waxaana laga heli karaa Xafiiska ku yaalla Wasaaradda Qorshaynta iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee loogu diraaayo boostada hab diwaangashan, ama adeeg leh helitaanka gaarsiinta ee “Guddiga Maalgashiga arrimaha dibadda L/H Wasaaradda Qorshaynta iyo Iskaashiga Caalamiga ah, Muqdisho, Soomaaliya”.
2. Waxaa kale oo u bannaan Maalgeliyaha Shisheeye inuu codsi si toos ah u geysto Xafiiska, oo siinaya caddeyn gaarsiin. Codsiyada waxaa kale oo email loogu diri

karaa Wasaaradda Qorshaynta iyo Iskaashiga Caalamiga ah, iyadoo la weydiisanayo helitaanka gaarsiinta.

3. Xafiisku wuxuu darsayaa codsiga si uu u hubiyo una caddeeyo iney dhameystiran yihiin shuruudaha laguna qancay.

QODOBKA- 9^{aad}:

Shuruudaha iyo habaaca oggolaanshaha

1. Muddo lixdan casho gudahood, laga bilaabo maalinta la qabtay arjiga maalgashiga oo dhammeystiran, Guddiga go'aankiisa waa in uu ku ogeysiiyaa codsadaha warqad diiwaangasashan. Haddii uu codsaduhu doorto, waxaa xafiiska toos uga qaadi kara qof wakiil ka ah oo caddeyn laga reebo inuu qaaday go'aanka.
2. Haddii loo baahdo wax ka beddel arjiga codsiga ah, Guddiga waa inuu isbeddelkaas ku ogeysiyaa codsadaha warqad Diiwaangashan ama waxaa toos xafiiska uga qaadi Kara qof ka wakiil ah.
3. Guddigu wuxuu ogeysilneyaa iyagoo u marinaaya xafiiska, oggolaanshaha maalgeliyaha shisheeye, wuxuuna soo saaraayaa "Shahaado Maalgelin Shisheeye ee Mashruuca la oggolaaday". Oggolanshahaas wuxuu maalgeliyaha shisheeye xaq u siinaayaa diiwaangelinta maalgelinta si waafaqsan sharcigaan.
4. "Shahaaddada Maalgashiga Mashruuca la oggolaaday" waxey jireysaa muddo 24 bilood ah laga bilaabo maalinta la bixiyay. Muddadas gudaheeda, codsaduhu waa in uu dalka ku soo wareejiyaa hantida ku tilmaaman Qodobka- 2^{aad}, faqradihiisa 1^{aad}, 2^{aad}, 3^{aad} iyo 4^{aad}. Haddli muddadaas la dhafo, Guddigu wuxuu siin karaa, haddii uu weydiisto codsaduhu, muddo dheeraad ah, ama keensan codsi cusub.
5. Si loogu kordhiyo Maalgelin dheeraad ah sida ku xusan Qodobka- 2(1) xarfaha (a) (b) (c) iyo (d) mashruuc horey loogu sameeyey maalgelin diiwaan-gashan waxaa loo baahan yahay codsi iyo oggolaansho, sida ku cad Qodobka- 8^{aad}, faqrada (1), (2), (3) iyo (4) ee Qodobka-n.

QODOBKA- 10^{aad}:

Shuruudaha iyo habaaca diiwaangelinta

1. Guddigu waa inuu ku dhaqaaqaa diiwaangelinta maalgelinta la ansixiyay isla marka uu maalgeliyaha shisheeye soo geliyo Soomaaliya hantida ku xusan Qodobka- 2 (1), xarfaha (a), (b), (3) iyo (4) si waafaqsan qodobbada iyo shuruudaha ku qoran "Shahaaddada Maalgelinta Shisheeye" ee mashruuca la oggolaaday. Waxaana ka dhalanaya rad ah in guddigu siiyo maalgeliyaha shisheeye "Shahaaddada Maalgelinta Shisheeye ee Diiwaangashan".
2. Haddii dalka loo soo wareejiyo hantida ku xusan Qodobka- 2,1 farqooyinkiisa b,c iyo d .Guddigu waa in uu ku dhaqaaqaa diiwaangelinta isla marka uu xaqiijiyo in

qiimaha uu maalgeliyaha shisheeye ku sheegay hantida uu dalka ku soo wareejiyey in yahay qiimaha dhabta ah ee suuqa. Guddigu wuxuu maalgeliyaha shisheeye weydiisan karaa caddeymo qoraal ah oo muujineya qiimaha hantida uu dalka ku soo wareejiyey. Haddii hantida lagu soo wareejiyo sida ku xusan Qodobka- 2, 1b, qiimahaas waa in lagu saleeyaa si waafaqsan sharciga keenista badeecada.

3. Maalgelinta shisheeye waxa lagu diiwaangellineyaa lacaag la sarrifi karo ee uu soo cadeeyay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

QODOBKA- 11^{aad}:

Dib u maalgelinta faa'idada

1. Faa'iidada asal ahaan ka timid maalgelin shisheeye ee diwaangashan dib ayaaa loogu maal gelin karaa isla mashruucii maaginta hore loogu sameeyey ama mashruuc kale, si waafaqsan sharciga.
2. Marka faa'idada noocaas oo kale dib loogu maal geliyo, waa in lagu soo wargeliyaa Guddiga si toos ah ama fariin qoraal oo diiwaangashan. Laguna Caddeyn karo warqadda gaarsiinta.
3. Guddiga waxuu ku dhaqaaqayaa inuu diwaan geliyo faa'idada maalgelin dib loo sameeyay iyadoo la isticmaalayo lacag la sarrifi karo taasoo ku cad shahaadada maalgelinta shisheeye lagu diiwaan geliyay. Qiimaha waxaa lagu saleynaayaa si waafaqsan sharciga iyo xeerarka lagu maamulo lacagaha qalaad.
4. Markaas kadib Guddiga wuxuu soo saaraayaa "Shahaadada Dib-u- maalgelinta".
5. Xuquuqda raaceysa wareejinta faa'idada iyo dib u celinta maalgelinta iyo sidoo kale faa'iidada uu sharcigan tilmaamayo, waxaa lagu saleynayaa maalgelintii asalka ah oo lagu daray faa'idada dib loo maalgeliyey
6. Haddii faa'ido dib loogu maalgeliyo mashruuc, aan ahayn mashruuc ku diiwaangashan maalgashiga shisheeye, waxaa lagu dhaqayaa Qodobada 8^{aad} iyo 9^{aad} ee sharcigan.

QODOBKA- 12^{aad}:

Wareejinta Macaashka

1. Faa'iidada asal ahaan ka timada Maalgashi Shisheeye oo si sharci ah u Diiwaangashan, si xor ah ayaa dibadda loogu wareejin karaa, ahna lacag sarifmi karta.
2. Haddii faa'iidadaasi qayb ka mid ah loo wareejiyo dibadda sannad gudihis, Maalgeliyaha Shisheeye wuxuu haraaga wareejiisan karaa sanooyinka xiga.

QODOBKA- 13^{aad}:

Dib-u-la-noqoshada Maalgashiga Shisheeye

1. Maalgashiga Shisheeye Sharci ahaan u Diiwaangashan, waxaa dibadda looga saari karaa shan sano kaddib marka laga bilaabo maalinta la Diiwaangalshey Maalgashiga asalka ah ee ku cayiman “Shahaadada Maalgelinta Shisheeye ee Diiwaangashan”.
2. Guddiga wuxuu karaa inuu yareeyo muddadaa la sheegay, iyada oo la tixgellneyo arrimaha mudnaanta ee soo hoos galaaya tilmaamaha siyaasadda sida ku cad Qodobka- 7^{aad} ee sharcigan.
3. Dabad u wareejinta maalgelinta waxaa lagu sameyn karaa lacagtii qalaad ee asalka ahayd ee ku cad “Shahaadada Maalgelinta Shisheeye ee Diiwaangashan”. Maaliyadda loo wareejineyo dibadda waa in ay tahay mid ka dhalatey iibinta wareejinta hantida iyo saamiyaasha shirkadda kana mid ah maalgelinta shisheeye ee leh shakhsiyad qaanuuneed ama shakhsi ahaanba u jira. Maalgeliyaha Shisheeye wuxuu awood u leeyahay in uu dibadda u wareejisto hantida maguurtada ah ee maalgelinta mashruuca, haddii uu doorto.
4. Haddii lacagta ka soo baxdey iibinta hantida maguurtada ah ay ka badato maalgelintii asalka ahayd ee lagu darey faa’iidada dib loo geliyey ee diiwaangashan, Maalgeliyaha Shisheeye wuxuu xor u yahay dibad u wareejinta farqiga, asagoo raacaya shuruucda canshuuraha ee jira iyo qawaaniinta sarrifka ee lacagaha qalaad.

QODOBKA- 14^{aad}:

Wareejinta Milkiyadda Maalgashiga Shisheeye iyo Shuruucda Ogeysiinta

1. Wareejinta milkiyadda maalgelinta shisheeye waxay ku imaanaysaa iibinta hantida ama u wareejinta saamiyaasha mashruuca la maalgeliyey qof ama hey’ad shakhsiyad qanuuneed leh.
2. Xaaladda u wareejinta maalgelin shisheeya qof ama shakhsiyad qanuuneed oo Soomaali degaan ah, wareejiyaha wuxuu luminayaa inuu ka faa’ideysto wixii xuquuq ahaa ee uu ku heli lahaa maalgeliye shisheeye ahaan.
3. Wareejin kasta waxaa waajib ku ah wareejiyaha iyo la wareegaha iney ka hor Guddiga ku wareejiyaan. Wargelintaa waxay raacsiinayaan qoraallada iyo dokumenti taageeraya kala wareejinta.
4. Ku wareejinta maalgelinta shisheeye maalgeliye kale oo shisheeye uma baahna oggolaansho cusub sida ku cad Qodobka- 9^{aad} ee sharcigan, waa iney wargeliyaan Guddiga oo kaliya sida ku xusan faqradda 3aad ee isla Qodobka-an.

QODOBKA- 15^{aad}:
Dhiirrigelinta Maalgelinta

Maalgelinta shisheeye waxay mudnaan u yeelanaysaa dhiirrigelin iyo tas-hiilaad, dhiirrigelinta waxaa mid ah fursad lagu heli karo heshiis kiro muddo dheer ilaa 99 sano oo lagu beddelanayo maalgelin wax ku ool ah si waafaqsan sharciga jira oo xeeriya mudaantaa iyo tas-hiilaadkaas.

QODOBKA- 16^{aad}:
Xadka amaah ka qaadashada ilaha dakhliga gudaha

1. Shirkad kasta oo ujeeddadeedu tahay maalgelin shisheeye si sharci ah u diiwaangashan, waxay amaah ka qaadan karaan hay'adaha ilaha dakhliga ee gudaha ilaa xadka uu gooyey Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed, oo kala tashanaya guddiga;
2. Dakhliga ka soo baxa amaahdii laga qaatay ilaha gudaha, waxaa loo isticmaali karaa oo keliya fulinta hawsha ku tilmaaman "Shahaaddada Maalgelinta Shisheeye ee Diiwaangashan". Guddigu wuxuu awood u leeyahay inuu hubiyo in sidaa loo fuliyey.

QODOBKA- 17^{aad}:
U fududeyn Shaqaalaha Shisheeye

1. Guddigu waa inuu hubiyaa in Hay'adaha Socdaalku u fududeeyaan helitaanka rukhsadaha dal ku gal iyo degganaanshaha shaqaalaha shisheeye ee u shaqeeya shirkad ku diiwaangashan sharcigan iyo Qoysaskooda.
2. Guddigu waxay kale oo hubinayaan in shaqaalaha iyo qoysaskooda loo oggolaado, marka ay u baahdaan sabab shaqo darted, iney tagi karaan goob kasta oo ka mid ah Soomaaliya.
3. Shirkad kasta oo ku diiwaangashan sharcigan, mar kasta oo la heli karo, waxay shaqaaleysaneysaa muwaadiniinta Soomaaliyeed oo aqoon leh. Maalgelinta shisheeye waa iney qeyb weyn ka qaadata u gudbinta teknooljiyada iyo kor u qaadista iyo kobcinta aqoonta maamuleed iyo tan xirfadeed ee ka jirta Soomaaliya. Maalgeliyaha shisheeye waa inuu shaqaaleyo ugu yaraan boqolkiiba konton (50%) muwaadiniinta deggan Soomaaliya.

QODOBKA- 18^{aad}:
Damaanadda Maalgelinta Shisheeye

1. Dhammaan Mashaariicda loo sameeyey maalgelin shisheeye waxay loola dhaqmayaa si la mid ah mashaariicda waddaniga ah.
2. Hantida maalgelinta shisheeye ee lagu diiwaangeliyey Sharcigan lalama wareegi karo marka laga reebo xaalad dan guud oo aan si kale loo xallin Karin.
3. Haddii ay dhacdo in lala wareego, waa in si dhakhso ah loo bixiyaa magdhow u dhigma. Magdhowgaas waa inuu u dhigma qiimaha suuqa oo caadil ah si xor ahna loo xawili karo.

QODOBKA- 19^{aad}:
Xallinta khilaafaadka

1. Khilaafaadka ku saabsan meelmarinta Sharcigan waa in lagu xaliyaa:
 - a. Hab lagula heshiiyey Maalgeliyaha shisheeye, ama haddii usan jirin heshiis lagu xaliyo;
 - b. Habraaca uu qorayo Heshiisyada u dhexeeya Jamhuuriyadda federaalka Soomaaliyeed iyo Dalka uu Maalgeliyuhu u dhashay, haddii la waayo sida ku xusan xarfaha (a) iyo (b),
 - c. Khilaafka waxaa loo gudblneyaa dhexdhexaadinta xarunta caalamiga ee xallinta khilaafadka la xiriira maalgashiga (XCXKHM), laguna dhacsiyay si waafaqsan habraaca Axdiga Xallinta Khilaafaadka Maalgelineed ee ka dhexeeya Dawladdaha iyo Muwaadiniin Dalal kale u dhashay ee lagu saxiixay Washington 19kii Maajo, 1965 (axdiga ICSID). Soomaliaya waxay ogooshahay in loo gudbiyo khilaafka ICSID, sida ku cad Qodobada axdiga ICSID ah
2. Haddii uusan jirin Heshiis ama Axdiga ku xusan farqada koowaad ee Qodobka-n, khilaafka waxaa lagu xallinayaa habraaca dhexdhexaadinta soo socda:. Waxaa la dhisayaa Guddi dhexdhexaadin ah oo ka kooban min hal xubin oo ka kala wakiil ah dhinacyada iyo xubin saddexaad oo Guddoomiye u noqota oo ay wadar ahaan u magacaabaaan labada xubnood ee khilaafka ka dhaxeeya. Haddii ay labada xubnood mudo 30 cisho gudahood ku gaari waayaan heshiin ay ku doortaan guddoomiye, laga bilaabo maalinta la magacaabay xubinka labaad, Shir – guddoomiye, waxaa noqonaaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya. Guddigu dhexdhexaadintu wuxuu degsanayaa nidaamka uu ku shaqaynayo iyadoo uusan xaddideyn nidaamka uu qorayo Xeerarka Habka Madaniga iyo Ganacsiga marka laga reebo qodobbada la xiriira damaanadaha asaasiga iyo xeerka curfiga caalamiga iyo mabaadii’da dacwo dhageysiga. Guddigu wuxuu xaqiijineyaa in khilaafaadka deg deg loo xalliyo. Go’aanada Guddiga waxaa lagu gaarayaa cod hal dheeri ah, wuxuuna noqonayaa mid kama-dambeys ah kuna waajibinaya dhinacyada iney u hoggaansamaan

waxaana loo fulinayaa sida xukun kasta oo kama dambeys ah. Guddiga dhexdhexaadinta ayaa go'aan ka gaaraya cidda bixineysa kharashka dhexdhexaadinta.

QODOBKA- 20^{aad}:

Faa'iidooyinka Maagelinta Shisheeye ee jirta

1. Maagalinta shisheeye ee hadda ka jirta Soomaaliya ee lagu diiwaangeliyay Shuruucdii hore ee ku saabsan Maagelinta Shisheeye waxey lahaanaayaan wax alla wixii xuquuq iyo waajibaad lagu siiyay Shuruucda la xusay.
2. Maagelinta Shisheeye ee noocaan ah waxey xaq u leeyihiin iney ka faa'iideystaan, inuu Maageliyaha Shisheeye dooran karo, nidaamka Sharciga cusub, haddii shuruudihii diiwaangelinta iyo nidaamka Sharciyadii hore la dhowray, Maageliyuhuna keeno caddeymo qoraal ah oo sidaas muujineya laguna kalsoonaan karo. Haddii ay sidaas u dhacdo, Maageliyaha Shisheeye wuxuu Guddiga weydiisan karaa diiwaangelin waafaqsan Sharciga cusub muddo bool iyo siddeetan (180) maalmood gudahood oo ka billaabaneysa taariikhda Sharciga cusub la soo saaray.

QODOBKA- 21^{aad}:

Maagelinta Shisheeye ee aan Sharcigan Hoos imaaneyn

Nidaamka Sharcigan laguma dhaqayo Maagelinta shisheeye ee la xiriirta baarista macdanta iyo hawlaha soo saaridda macdanta oo ay ku jiraan kuwa la xiriira warshadaha batroolka iyo quwadda nukliyeerka.

Maagelintaas waxaa lagu dhaqayaa Sharciga baarista iyo soo saarida macdanta iyo Xeer-nidaamiyaha Macdanta iyo Heshiisyada ay isla galeen Dawladda Soomaaliyeed iyo ciddii dan ka leh.

QODOBKA- 22^{aad}:

Waajibaadka Wargelinta la Xiriirta Mucaamalaadka

Maagelinta shisheeye

Bangiyada, Nootaayaada Guud, Hay'adaha Dawladda ee ku lug leh Maagelinta shisheeye waa in ay Guddiga ku wargaliyaan wixii dhaqdhaqaaq macaamileed ee ay la yeeshaan, 30 maalmood guddahood, laga billaabo maalinta dhaqdhaqaaqa macaamilaadka la sameeyay. Arrintan waxa ay la xiriirtaa Arrimaha ay ka mid yihiin Dhismaha Shirkadaha iyo mashaariicda, amaah ka qaadashada Hay'adaha dakhliga dhaqaalaha ee Gudaha ama Dibedda, xawilaadda faa'iidadada iyo dibad u wareejinta maagelinta.

QODOBKA- 23^{aad}:

U hoggaansanaan la'aanta Sharciga Soomaaliyeed

U hoggaansanaan la'aanta Sharciga Soomaaliyeed ee Maageliyaha shisheeye, waxay dhaxalsiineysaa inuu waayo wixii faa'iido ama xuquuq uu ku heli lahaa Sharcigan.

QODOBKA- 24^{aad}:

Ka faa'iideysiga shuruuc cusub ee dan u ah

Nidaamka Sharcigaan marnaba kama reebaayo in Maageliyaha Shisheeye ka faa'iideysto qodobbada dan u ah ee shuruucda la soo saari doono.

QODOBKA- 25^{aad}:

Xeer-nidaamiye

Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya marka uu arko tallo soo jeedinta Guddiga Maagelinta Shisheeye, dhegeystana Wasiirka Qorshaynta Qaranka iyo Golaha Wasiirada, wuxuu soo saarayaa Xeer-hoosaad si habsami ah loogu meelmariyo Sharcigan.

QODOBKA- 26^{aad}:

Baabi'in

Sharci kasta oo aan la socon karin Sharcigaan waa la baabi'iyay.

QODOBKA- 27^{aad}:

Dhaqangal

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa markii lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.

Tusmo:

QODOBKA- 1^{aad}: Qeexis	1
QODOBKA- 2^{aad}: Qaababka Maalgelinta Shisheeye.	1
QODOBKA- 3^{aad}: Guddiga Maalgashiga Shisheeye	2
QODOBKA- 4^{aad}: Xilalka Guddiga.....	2
QODOBKA- 5^{aad}: Guddiga: Kooramka iyo Codka	3
QODOBKA- 6^{aad}: Xafiiska Horumarinta Maalgashiga Shisheeye	3
Qodobka- 7^{aad}: Mudnaanta Maalgelinta iyo Qeybaheeda	4
Qodobka- 8^{aad}: Habraaca Codsiga	4
Qodobka- 9^{aad}: Shuruudaha iyo habaaca oggolaanshaha	5
Qodobka- 10^{aad}: Shuruudaha iyo habraaca diiwaangelinta.....	5
QODOBKA- 11^{aad}: Dib u maalgelinta faa'idada	6
QODOBKA- 12^{aad}: Wareejinta Macaashka	6
QODOBKA- 13^{aad}: Dib-u-la-noqoshada Maalgashiga Shisheeye	7
QODOBKA- 14^{aad}: Wareejinta Milkiyadda Maalgashiga Shisheeye iyo Shuruucda Ogeysiinta	7
QODOBKA- 15^{aad}: Dhiirrigelinta Maalgelinta	8
QODOBKA- 16^{aad}: Xadka amaah ka qaadashada ilaha dakhliga gudaha	8
QODOBKA- 17^{aad}: U fududeyn Shaqaalaha Shisheeye	8
QODOBKA- 18^{aad}: Damaanadda Maalgelinta Shisheeye	9
QODOBKA- 19^{aad}: Xallinta khilaafaadka	9
QODOBKA- 20^{aad}: Faa'iidooyinka Maalgelinta Shisheeye ee jirta.....	10
QODOBKA- 21^{aad}: Maalgelinta Shisheeye ee aan Sharcigan Hoos imaaneyn.....	10
QODOBKA- 22^{aad}: Waajibaadka Wargelinta la Xiriirta Mucaamalaadka	10
QODOBKA- 23^{aad}: U hoggaansanaan la'aanta Sharciga Soomaaliyeed	11
QODOBKA- 24^{aad}: Ka faa'iideysiga shuruuc cusub ee dan u ah.....	11
QODOBKA- 25^{aad}: Xeer-nidaamiye	11
QODOBKA- 26^{aad}: Baabi'in.....	11
QODOBKA- 27^{aad}: Dhaqangal	11